

17. Ha u yeedho gargaarihiisa.
18. Waxaannu u yeedhi Malaa'ig darane.
19. Saas ma aha ee warkiisa ha maqlin Sujuudha una dhawow (Eebe).


فَلَيَعْلَمَ نَادِيَهُ ﴿١٧﴾

سَنَعَ الْزَّانِيَةَ ﴿١٨﴾

كَلَّا لَا نَطْعُمُ وَاسْجُدُو وَأَقْبَرُ ﴿١٩﴾

Suuraddani waa Suuraddii Quraanka u soo hor dagtagtay, waxayna ka billaabatay faridda wax barashada iyo Qalinka, taasoo ku tusin sida Diinta Islaamku ugu horrayso wax barashada iyo la dagaallanka Jahliga, waxaa kalooy ku tusin xumaanta isla waynida iyo Dadka oo xaqqa laga reebo, iyo inaan la maqlin xumaanle warkiis ee Eebe lagu xidhaado illeen isagaa xoog iyo awoodba leh. Abuu-Hurayra waxa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yidhi: «Addoonku wuxuu Eebihiis ugu dhawayah markuu sujuudsanyahay ee badiya Ducada. Waxaa wariyay Muslim. Al-Calaq (1-19).

\* Wax yar oo ku dhaga darbiga riximka (dib u eegaha).



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista:

1. Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka LaylatulQadarka ah (sharafata leh).
2. Ma taqaanna LaylatulQadarka.
3. Waa Habeen ka khayr badan Kun Bilood (oo kale).
4. Waxaana soo daga Malaa'igta (kalle) iyo Malaku Jibril habeenkaas idanka Eebe dartiis iyo amarkiisa.
5. Waana Habeen nabadgalyo inta waagu ka baryi.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ ﴿١﴾

وَمَا أَذَرْنَاكَ مَائِلَةً لِّلْقَدْرِ ﴿٢﴾

لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِّنْ أَلْفِ شَهْرٍ ﴿٣﴾

تَرَلَّ الْمَلَائِكَهُ وَالرُّوحُ فِيهَا يَا إِذْنَ رَبِّهِمْ ﴿٤﴾

مِنْ كُلِّ أَمْرٍ ﴿٥﴾

سَلَّمَهُ حَقَّ مَطْلَعِ النَّجْرِ ﴿٦﴾

Wuxuu Eebe innoogu sheegay Suuraddan inuu Quraanka sharafta leh soo dajiyay Habeenkaa wanaagsan ee ka khayr badan kun bilood, waxaana la sheegay in Habeenkaasi ku jiro Bisha barakaysan ee Soon. Saas daraadded mar hadduu yahay Habeen Sharaf leh Malaa'igtuna soo dagi Habeen nabadgalyana yahay, waa in lagu dadaalaa sidii loo helilahaa wanaaggana la badiyo'xumaantana la yareeyo. Abuhurayra waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» inuu yidhi: «Ruuixii Istaaga Laylatul-Qadarka «Salaad» Rumayn iyo ajri doonid darteed waa loo Dhaafaa wixii hormay oo dambigiisa ah» Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Al-Qadr (1-5).